# Wicitaanada Xiriiriyaha Carruurnimada Hore| Jannaayo 2025

## Mawduucyada laga hadlayo inta lagu jiro wicitaanka


Wicitaanada Xiriiriyaha Carruurnimada Hore| Jannaayo 2025 .......... 1

Ku saabsan Wicitaanada Xiriiriyaha Carruurnimada Hore .......... 2

Su'aalaha Wicitaanada Xiriiriyaha .......... 2

Barnaamijka The Great Start Compensation Payment Support Program .......... 2

Helitaanka Daryeelka Carruurta .......... 3

Alaabaha Baaritaanka COVID-19 .......... 4

Shati siinta .......... 4

Adeegyada Garyaqaanka .......... 6

Adeegyada Waxbarashada Hore .......... 6

## Ku saabsan Wicitaanada Xiriiriyaha Carruurnimada Hore

Saddexdii biloodba mar, gobolku wuxuu martigeliyaa Wicitaanada Xiriiriyaha ee adeeg-bixiyeyaasha daryeelka carruurta iyo macallimiinta hore si ay uga jawaabaan su'aalaha la xiriira sharciga, ruqsadda, barnaamijyada, deeqaha iyo in ka badan. Ujeedada wicitaanku waa in laga jawaabo caddeynta su'aalaha laga yaabo in adeeg-bixiyeyaasha ay qabaan. Wicitaanada waxaa lagu martigeliyaa khadka tooska ah ee gudaha WebEx, iyadoo duuban oo diyaarna ku tahay bogga Xiriiryaha Carruurnimada Horeoo loogu talagalay kuwa awoodi waayay inay kasoo qaybgalaan. Turjuumadaha su'aalaha laga jawaabay inta lagu jiro wicitaanka ayaa sidoo kale loo heli karaa onlayn ahaan.

Dhammaan macallimiinta noocyada kala duwan waxaa lagu casuumayaa wicitaanadaas. Waxaanu soo dhaweyneynaa su'aalaha ka imanaya barnaamijyada dugsiyada carrruunimada hore, barnaamijyada shatiga leh, xarumaha shahaadada leh, barnaamijyada ka reeban, adeeg bixiyeyaasha sharciga ah ee aan shatiga lahayn, Qoyska, Asxaabta iyo daryeelayaasha Deriska, iyo shakhsiyaadka xiiseynaya inay bilaabaan ganacsiga daryeelka carruurta.

## Su'aalaha Wicitaanada Xiriiriyaha

### Barnaamijka The Great Start Compensation Payment Support Program

- Ma jiraan wax isbeddel ah oo ku imanaya Barnaamijka Great Start Compensation Support Payment markaan galno 2025?
  - Jawaab: Barta Bixiyaha, xarumaha waxaa laga codsanayaa inay la wadaagaan macluumaadka magdhawga aasaasiga ah ee codsiga koowaad ee barnaamijkooda ka dibna saddexdii biloodba mar ay hore u socdaan.

    $375 halkii qadarka FTE ayaa la xaqiijiyay illaa Juun 2026. Macluumaadka ku saabsan xaddiga abaalmarinta ee wareegga Taageerada Magdhowga waxaa laga heli karaa qaybta Lacag Bixintaee bogga websaydhkan.

    Markay aqbalaan lacagaha Great Start Compensation, bixiyeyaasha waxay aqbaleen inay qoraan oo ay wadaagaan sida ay u isticmaalaan lacagaha. Warbixinta Isticmaalka Lacagta waxay ururin doontaa macluumaad ku saabsan sida helayaasha Great Start Compensation ay u isticmaalayaan lacagaha la helay iyo saameynta lacagahaas. Warbixintan waxa waajibiyay sharciga waxana la rabaa in la soo gudbiyo hal mar sannadkiiba. Barnaamijyadu waxay haysan doonaan sagaashan (90) maalmood si ay u dhammaystiraan una soo gudbiyaan warbixintooda.

    - Tusaalaha Warbixinta Isticmaalka Lacagaha: Adeeg-bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta ee Shatiga ka haysta Gobolka ama Qabiilka (PDF)
    - Tusaalaha Warbixinta Isticmaalka Lacagaha: Adeeg-bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta ee shatiga ka haysta Gobolka ama Qabiilka (PDF)

    Jadwalka loogu talagalay Helitaanka Warbixinnada Isticmaalka Maalgelinta:

        - Abriil 2025: Xarumaha shahaadada iyo shatiga leh ee markii ugu horreysay aqbalay Maalgelinta Great Start Compensatio ee Oktoobar 2023 ayaa la siin doonaa helitaanka Warbixintooda Isticmaalka Maalgelinta ee Barta Bixiyaha.
        - Bilowga Maay 2025: Xarumaha shahaadada iyo shatiga leh ee markii ugu horreysay aqbalay Maalgelinta Great Start Compensation bishii Oktoobar 2023 waxa si bil dhaaf ah marin loogu siin doonaa Warbixintooda Isticmaalka Lacagaha ee ku Jirta Barta Dhexe ee Adeegbixiyaha.
        - Mustaqbalka: Dhamaadka gu'ga 2025, adeeg-bixiyeyaasha daryeelka carruurta ee shatiga leh iyo adeeg-bixiyeyaasha shatiga ka haysta Qaranka Qabiilka ayaa marin loogu siin doonaa Warbixintooda Isticmaalka Lacagaha waxana loo dhex marin doonaa nidaam iimayl ku dhisan.

## Helitaanka Daryeelka Carruurta

- Miyay jiraan lacago dawladeed oo la heli karo oo loogu talagalay ururada aan macaash doonka ahayn si ay uga qoysaska uga caawiyaan kabka ama kaalmada helitaanka daryeelka carruurta?
    - Jawaab: Fursada ugu weyn ee deeqda loogu talagalay kuwa aan macaash doonka ahayn si ay qoysaska uga caawiyaan macluumaadka iyo helitaanka daryeelka carruurta waa ilaheena daryeelka carruurta ee gobolka oo dhan iyo deeqda gudbinta. Deeqda loogu talagalay ilaha daryeelka carruurta ee gobolka oo dhan iyo adeegyada gudbinta ayaa dhowaan mar kale la siiyay Child Care Aware ee Minnesota. Deeqdan waxay maalgelisaa adeegyada macluumaadka waalidka iyo martigelinta iyo dayactirka parentaware.org.

      Child Safety and Permanency (Badbaadada Carruurta iyo Joogtaynta), oo ah qayb kale oo ka mid ah Waaxda Carruurta, Dhallinyarada, iyo Qoysaska, waxay kormeeraan barnaamijka deeqda ee Xarunta Kheyraadka Bulshada (Community Resource Center, CRC). Barnaamijku wuxuu maalgeliyaa hay'adaha aan macaash doonka ahayn ee gobolka oo dhan si ay u taageeraan xasiloonida qoyska iyo fayo-qabka dhaqaalaha, oo ay ku jiraan helitaanka ilaha daryeelka carruurta. Caawiyayaasha CRC waxay isticmaalaan MNbenefits si ay u caawiyaan qoysaska, CCAP waxay ku jirta codsiga MNbenefits.

      Barnaamijka deeqda Qoyska, Saaxiibka iyo Deriska (The Family, Friend and Neighbor, FFN) wuxuu ururada ku saleysan bulshada siiyaa maalgelinta gobolka iyo federaalka, oo ay ku jiraan ururada aan macaash doonka ahayn, si ay u taageeraan daryeelayaasha aan rasmiga ahayn iyo qoysaska ay u adeegaan. Hal hawl oo deeq-helayaasha loo oggol yahay sida waafaqsan Sec. 142D.24 MN Statutes waa in la siiyo daryeelayaasha FFN iyo qoysaska carruurta macluumaadka ku saabsan daryeelka hore ee bulshada ku saleysan iyo barnaamijyada waxbarashada iyo kaalmada maaliyadeed ee qoysaska la heli karo, oo ay ku jiraan laakiin aan ku xaddidnayn kaalmada daryeelka carruurta ee cutubkan iyo deeqaha waxbarashada hore. Waqtigan xaadirka ah 20 deeq-helayaal FFN ah waxay u adeegaan bulshooyinka ku xeeran Minnesota iyadoo qaarkood ay fuliyaan hawshan. Wareegyada deeqda mustaqbalka waxaa lagu maalgelin doonaa Habka Codsiga Soo jeedinta.

## Alaabaha Baaritaanka COVID-19

- Intii lagu guda jiray masiibada, gobolka wuxuu daryeelka carruurta iyo iskuullada siiyay qalabka baaritaanka COVID-19 oo bilaash ah. Alaabaha weli ma la heli karaa?
    - Jawaab: Barnaamijkan wuxuu gabaabsi noqday 2023. Dhammaan dadka reer Minnesota waxaa lagu dhiirigelinayaa inay booqdaan bogga websaydhka baaritaanka MDH si ay wax badan uga bartaan baaritaanka COVID-19. Waxa kale oo aad ka dalban kartaa laba kiis oo guriga ah oo bilaash ah www.covidtests.gov haddii xadka gurigaaga aan la gaarin. Khadka taageerada (1-833-431-2053) ayaa la heli karaa si looga caawiyo dadka isticmaalaya foomkan dalabka, haddii loo baahdo.

## Shati siinta

- Adeeg-bixiye ayaa soo sheegay in foomka tallaalka cusub ee daryeelka carruurta uu yahay mid jahwareersan. Foomkii hore weli ma la isticmaali karaa ama sidee adeeg-bixiyeyaashu ay u hubin karaan inay si sax ah u isticmaalaan foomka cusub?
    - Jawaab: Dukumiintiyada tallaalka waa inay ku jiraan diiwaanka ilmaha. Daabacaadda tallaalka ee xarun caafimaad waa diiwaan caafimaad waxaanay buuxin doontaa shuruudaha dukumiintiyada. Uma baahna saxeex. Macluumaadkan waxaa sidoo kale laga heli karaa Minnesota Immunization Information Connection (MIIC) oo ay hayso Waaxda Caafimaadka. Foomka kaliya ee loo baahan yahay si loogu diiwaangeliyo tallaalada waa midka ka dhaafida caafimaad ama mid aan caafimaadka ahayn. Foomkan waxaa laga heli karaa websaydhka MDH Waxaa mas'uul ka ah waalidka inuu buuxiyo foomka oo uu siiyo adeeg-bixiyaha daryeelka ilmaha.

- Si kastoo ay tahay cimilada Minnesota, barnaamijyadu way socdaan. Mid ka mid ah barnaamijyada daryeelka carruurta waxay qaadataa safar maalinle ah oo ku socdaalaan beerta si ay u sahamiyaan dabiicadda u dhow. Mararka qaar ilmo iska diiwaangeliyay barnaamijka ayaa diidi kara inay aadaan safarka socdaalka banaanka. Marka ay taasi dhacdo, macallinku wuxuu ilmahan la jooga goobta shatiga leh wuxuuna la shaqeeyaa agabka fasalka ilaa kooxdu ka soo laabato socdaalka safarka. Tan ma loo tixgeliyaa inay tahay kala reebitaan oo miyay u baahan tahay warbixin la dhammaystiro?
    - Jawaab: Maya, tani looma tixgelin doono inay tahay kala reebitaan kooxeed oo uma baahnid warbixin gooni ah in la dhammaystiro.

- Adeeg-bixiye kale ayaa is weydiinaya: Waa maxay sababta ay tahay inaanu caleemo badan ku haysano goobaheena ciyaarta?
    - Jawaab: Xarumaha daryeelka carruurta iyo barnaamijyada daryeelka carruurta ee qoyska, ma jiraan shuruudo hadda ku jira Xeerka ama Shuruudo ku saabsan aagagga dhicitaanka ama nooca walxaha buushka, sida caleemaha, taas oo loo baahan yahay. Waxaan kula talineynaa in adeeg-bixiyeyaasha ay raacaan tilmaamaha soo saaraha ee qalabka lagu ciyaaro (oo laga yaabo inay dhahaan waxyaabo sida ha dulsaarin cawska) iyo in dusha sare ee hoosta iyo agagaarka qalabka ay ku filan tahay inay ka ilaaliyaan carruurta dhaawaca haddii ay dhacaan. Ilaha wanaagsan ee macluumaadka ku saabsan mawduucan waa U.S. Consumer Product Safety Commission (Komishanka Badbaadada Badeecadaha Dadweynaha) Buugga Badbaadada Goobaha Ciyaarta ee Dadweynaha

- Haddii barnaamijka daryeelka carruurta aanu awoodin inuu gaaro shati bixiyahooda, yaa la rabaa inay la xiriiraan?
    - Jawaab: Xarumaha daryeelka carruurta ee shatiga leh ama shahaado leh, waxaa jira shati bixiye u diyaar ah wicitaan Isniinta ilaa Jimcaha laga bilaabo 8:00 subaxnimo ilaa 4:30 galabnimo oo kaa caawin kara marka shati bixiyahaaga aan la heli karin. Waxaad la xiriiri kartaa shati bixiyahayga wicitaanka u diyaarka ahl adigoo wacaya 651-431-6015 ama adoo iimeyl u dirayadhs.ccc.licensing@state.mn.us.

      Daryeelka carruurta qoyska, haddii adeeg-bixiyaha daryeelka carruurta aanu awoodin inuu gaaro shati bixiyaha degmadooda, waa inay la xiriiraan kormeeraha degmadooda ama xiriir kale oo degmada ah. Haddii aanay weli awoodin inay gaaraan liisankooda, waxay la xiriiri karaan DHS.

- Goorma iyo halkee ayaa laga heli doonaa tababarka gaadiidka BEST ee loo baahan yahay?
    - Jawaab: The Minnesota Department of Public Safety (DPS) waxay bixinta tababarka xannibaadda rakaabka carruurta ee CARS u beddeshay BEST laga bilaabo Janaayo 1, 2025. BEST wuxuu leeyahay laba qaybood oo tababar ah – qayb khadka tooska ah iyo qayb shaqsi ah oo uu bixinayo fududeeye BEST ah. Qeybta khadka tooska ah ee tababarka waxaa lagu buuxiyaa iyada oo la dhammaystiro Aasaasiga Kursiga Gaariga. Websaydh cusub,Buckle Up MN,ayaa muujinaya halka adeeg-bixiyeyaashu ay ka heli karaan fududeeyaha ugu fiican ee qaybta shaqsiyeed ee tababarka.

- Haddii sharciga la soo jeediyey ee "aan ku celcelin tababar muddo 5 sano ah" uu gudbo, taasi micnaheedu ma tahay in adeeg-bixiyeyaasha daryeelka carruurta qoysku aanay awoodi doonin inay si isdaba joog ah u qaataan Kormeerka Badbaadada Daryeelka Carruurta Qoyska (sannad kasta) oo ay tirinayaan saacadaha tababarka?
    - Jawaab: Tani waxaa laga yaabaa inay xigato shuruudaha qabyo-qoraalka ah. DHS waxay hadda ka shaqeyneysaa qabyo-qoraal labaad oo dadweyne oo ay ku jiraan jawaab celinta la helay oo dhawaan loo sii deyn doono dadweynaha. Waqtigan xaadirka ah ma jiro sharci la soo jeediyey oo ka socda DHS si loo hirgeliyo "in aan lagu celin tababarka 5-tii sannadoodba mar."  DHS/DCYF waxay ku siin doontaa hagitaan ku saabsan su'aalo gaar ah sida tan marka qabyo-qoraalka kama dambaysta ah ay ansixiso golaha sharci dejinta, oo la filayo inta lagu jiro kalfadhiga sharci dejinta ee 2026.

- Sharciga hadda ku xeeran caawiyeyaasha inay kaligood noqon karaan 25% maalintii miyaa la kordhin doonaa ka dib Juun 2025?
    - Jawaab: Sharcigan wuxuu ahaa xarumaha oo keliya, luuqada caawiyaha ee hadda jirtana waxay dhammaan doontaa 1-da Luulyo, 2025, haddii aan sharcigu sannadkan u dhaqmin inuu wax ka beddelo. DHS ma soo saarayso soo jeedin sharci oo ku saabsan arrintan.

## Adeegyada Garyaqaanka

- Daryeelka ilmaha qoysku wuxuu leeyahay garyaqaan si uu u taageero, xarumaha ma leeyihiin qof sidaas oo kale ah sidoo kale?
    - Jawaab: Garyaqaanka loogu talagalay adeeg-bixiyeyaasha Daryeelka Carruurta ee Qoyska waa boos shaqo ay soo saareen sharci dejinta 2021 iyadoo lagu saleynayo talobixin ka timid Gudiga Daryeelka Carruurta Qoyska. Waqtigan xaadirka ah, ma jiro garyaqaan loogu talagalay xarumaha daryeelka carruurta.

## Adeegyada Waxbarashada Hore

- Dhowaan waxaa isbeddelay u qalmitaanka dugsiga barbaarinta ee dugsiga ku salaysan. Marka sharcigu tilmaamayo u-qalmitaanka waxaa ka mid noqon kara "waxaa lagu qeexaa khatarta degmada dugsiga," maxay taasi run ahaantii ka dhigan tahay? Ma jiraan liis ama tilmaamaha MDE oo ku saabsan "khatarta" qeexitaanka degmooyinka ayaa loo maleynayaa inay isticmaalaan si loo go'aamiyo u-qalmitaanka?
    - Jawaab: Luuqadan waxaa loogu talagalay in lagu siiyo degmooyinka dugsiyada dabacsanaan si loo go'aamiyo sida loogu qalmo maalgelinta carruurta VPK iyo diyaargarowga dugsiga. Macluumaadka laga soo ururiyey qoysaska iyo bulshada degmada waxaa loo isticmaali karaa si loo go'aamiyo waxyaabaha dheeraadka ah ee saameeya qoysaska iyo carruurta si kale u qalma inay ka qayb galaan barnaamijkooda. Tusaalooyinka xaaladaha qaybtan waxaa ka mid noqon kara:
        - Dhibaatada qoyska ama duruufaha xad dhaafka ah ee mid adag ka dhigaysa iska bixinta daryeelka ama helitaanka xulashooyin kale oo dugsiga barbaarinta ah.
        - Sababaha khatarta bulshadu go’aamisay.
        - Helitaanka xaddidan ee xulashooyinka kale ee daryeelka sababo la xiriira gaadiidka, helitaanka, ama masaafada.
        - Haddii qoysku u qalmo maalgelinta hoos timaada PWII heerka u-qalmitaanka ee 85% Heerka Dakhliga Dhexe ee Gobolka, gaar ahaan haddii ay jiraan arrimo kale oo khatar ah oo jira.

- Maaddaama cilmi-baarista maskaxda ee ballaaran oo aad loo tixgeliyo ay hadda iftiimineyso muhiimadda labada sano ee ugu horreeya, maxay yihiin qorshayaasha dheeriga ah ee lagu ogaanayo dhallaanka iyo ilmaha ka hor da’da 18 bilood iyo bixinta faragelinta hore?
    - Jawaab: Hay’adaha kale ee gobolka ayaanu iska kaashanaa xaalado cayiman oo la og yahay inay xannibayaan korriinka, kuwaas intooda badani marka koobaad carruurta ka muuqdaan 18-ka bilood ee noloshooda u horreeya, haddii aanay ku dhalanba. Gobolku sidoo kale wuxu maalgeliyaa oo taageeraa Guddiyada Isdhexgalka Hore ee Gobolka ee bixiya ilaha gudbinta aasaasiga ah, sida rugaha caafimaadka, adeegyada bulshada ee degmada iyo barnaamijyada ECE. Waxaa sidoo kale jira maalgelin ka timid deeqdayada Federaalka Qaybta C oo taageerta olole wacyigelinta dadweynaha oo ay ku jiraan agab, biilasha, xayeysiisyada raadiyaha iyo warbaahinta bulshada oo labadaba gobolka oo dhan iyo gobol ahaan gaar u ah si looga caawiyo helitaanka ereyga muhiimadda faragelinta hore.